Cheryl Miller: Ku soo dhowow taxanaha warbaahinta cusub ee dhanka maqalka ee Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon, OHCC Connections. Waxaan ahay Cheryl Miller, Agaasimaha Sare ee Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon. Waxaanu soo bandhigaynaa warbaahintan dhanka maqalka 'podcast' si macluumaad loola wadaago dadku ku nool Oregon ee bixiya adeegyada guriga-dhexdiisa, dadka iyaga shaqaaleysiiya iyo kuwo kale oo badan oo daneynaya xaqiijinta in dhammaan dadka ku nool Oregon heli karaan adeegyada iyo taageerooyinka ay u baahan yihiin. Waxaanu bilaabaynaa warbaahintan dhanka maqalka ah 'podcast' oo leh taxane shan qaybood ah oo ku saabsan shuruudaha tababarka ee cusub ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed. Iyada oo loogu talagalay taxanahan shanta qaybood ah ee ku saabsan tababarka, waxaa igula soo biiri doona hawl-wadaagayaasheena ka socda Tababarka Carewell SEIU 503, Sarah Edwards iyo Whitney Taylor. Sarah waa agaasimaha Tababarka Carewell SEIU 503. Whitney waa maamulaha horumarinta manhajka ee Tababarka Carewell SEIU 503. Sarah, ma wadaagi kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mawduucyada aanu kaga hadli doono taxanahan shanta qaybood ah?

Sarah Edwards: Haa, dabcan. Tani, qaybteena u horreysa, waxaanu ku bixin doonaa guudmarka sida tababarku isku beddelayo Oregon dhexdeeda iyo qiimaha tababarku u leeyahay shaqaalaha iyo dadka ay taageeraan. Qaybaha kale ee taxanaha waxaa lagu bixin doonaa macluumaad ku saabsan waxa shaqaaluhu u baahan yihiin in ay ogaadaan, shuruudaha dib u eegista ee loogu talagalay shaqaalaha hadda jira, macluumaad ku saabsan sii wadashada koorsooyinka waxbarashada, iyo ugu dambeyntii, waxaanu ka hadli doonaa su'aalaha inta badan la isweydiiyo.

Cheryl Miller: Waad mahadsan tahay, Sarah. Aynu ku bilawno sababta aanu uga hadlayno tababarka iyo waxa isbeddelaya Oregon dhexdeeda. Whitney, ma na siin kartaa macluumaad cusub oo ku saabsan waxa isbeddelaya?

Whitney Taylor: Haa. Isbeddelada hadda dhacaya waa natiijada sharci cusub oo la ansixiyay 2018. Sharci dejinta Oregon ayaa ansixisay Sharciga Senate-ka 1534 si uu ugu tilmaamo Oregon in ay qaataan shuruudaha tababarka cusub iyo qiimeynta tababarka. Iabeddelkani wuxuu khuseeyaa shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed. Shuruudahani waxaa loogu talagalay in la taageero shaqaalaha adeegyada iyo taageerada siiya dadka hela adeegyada guriga-dhexdiisa ee ay maalgeliso Medicaid ama Mashruuca Madaxa bannaan ee Oregon. Shuruudahani waxay ku bilaabmaan wejiyo kala duwan. Hadda, waxaan ku jirnaa marxalada tijaabada ah. Waxaan ku bilownay soo bandhigida qaybo tijaabo ah ama tabaruc ah qaarkood ee tababarka horraantii 2020.

Cheryl Miller: Sarah, iyada oo loogu talagalay dadka ku cusub mawduucan, ma u sharrixi kartaa waxa hadda looga baahan yahay dadka qabta shaqadani?

Sarah Edwards: Hubaal, waan ku farxi lahaa inaan sidaasi sameeyo. Markii hore, shaqaalaha waxaa looga baahday in ay maraan jihayn 'orientation' waxayna haysteen qiyaastii 90 maalmood in ay sidaasi sameeyaan ka hor inta aysan noqon daryeel bixiye,

Shaqaaluhu waxay sidoo kale heli karaan fursadaha tababar ikhtiyaari oo la adeegsanayo Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon, iyada oo Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ay sidoo kale bixiso shahaadooyin, kaasi oo shaqaalaha la siiyay wado ay u maraan mushahar sareeya. Sharciga Senate-ka 1534 ayaa aqoonsaday in shaqaalaha oo dhan iyo dadka iyaga shaqaaleysiiya ka faa'iideystaan haddii shaqaaluhu helaan tababar ka badan waxa hadda la isku siiyo jihaynta 'orientation'. Tani waxaa ka mid ah xubnaha ka tirsan qoyska ee bixiya adeegyo loogu talagalay dad ay isku dhow yahay sababta oo ah waxay u baahan yihiin taageero, sidoo kale.

Cheryl Miller: Goorma ayay shaqaaluhu u baahan yihiin in ay isku diiwaan geliyaan tababarkan cusub?

Whitney Taylor: Waa hagaag, waxaa jira su'aalo dhowr oo ay leedahay su'aashaasi, laakiin jawaabta oo gaabani waa in tababar la heli karo hadda. Waxaanu bilawnay koorsooyin cusub iyaga oo tijaabo ahaan ama hordhac ah sanadkii hore, si shaqaaluhu tababarkani hadda uga qayb qaadan karaan hab ku saleysan ikhtiyaari. Ka dhigida tababarkan laga dhigayo mid la heli karo goor hore, waxaanu awoodnay in aanu helno jawaab calin oo wanaajino koorsooyinka.

Cheryl Miller: Whitney, ma nooga sheegi kartaa wax yar oo dheeraad ah oo ku saabsan tababarka la bixin doono? Ogaantaa, muddo intee le'eg ayuu tababarku yahay, miyayna shaqaalahu tahay in ay iska iska bixiyaan?

Whitney Taylor: Haa, kuwani waa su'aalo wanaagsan, marka hore, waxaan rabaa in aan iraahdo in koorsooyinkani ay lacag la'aan u yihiin shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed. Xaqiiqdii, shaqaaluhu waxay dhab ahaantii waxay heli doonaan lacagta lagu helo tababarka 'stipend' oo loogu talagalay tababarka balse ma ah jihaynta.

Cheryl Miller: Wow, taasi waxay u egtahay mid wanaagsan.

Whitney Taylor: Waa sidaasi. Sida tababarka loo qaabeeyay loogu talagalay shaqaalaha cusub iyo kuwa hadda jira, waxaa jirta saddex qaybood oo tababar, mid kasta dhererkiisu yahay afar saacadood. Qaybahani waxaa lagu soo bandhigaa habab kala duwan oo ay ku jiraan mid shakhsi ahaaneed, koorsooyin dhanka internet-ka ah ee qofka waqtigiisa ku xiran 'self-paced' iyo aqoon isweydaarsiga dhanka internet-ka oo toos ah.

Cheryl Miller: Marka haddaan si sax ah kuu maqlay, taasi qiyaastii waa isugeyn dhan 12 saacadood oo tababar ah. Taasi ma saxbaa?

Whitney Taylor: Taasi waa sax.

Cheryl Miller: Sarah, waa maxay noocyada shaqaaluhu ku baran doonaan inta uu socdo taxanahan tababareed?

Sarah Edwards: Mawduucyada tababarku waa tallaabooyinka dhanka ammaanka iyo xaaladda degdega ah, fahamka shuruudaha loogu talagalay daryeel bixiyayaasha dhaqaalahooda lagu bixiyay lacagta Medicaid, bixinta adeegyada qofka ku saleysan, fahamka sida loo taageero baahiyaha jireed iyo dareen ee dadka hela adeegyo iyo taageerooyin, maareynta daawooyinka, iyo bixinta daryeelka shakhsi ahaaneed iyo ka caawinta hawlaha nolol maalmeedka la xiriira.

Cheryl Miller: Taasi waxay u eg tahay in uu ka hadli doono mawduucyo wanaagsan. Ma noo sheegi kartaa cidda la timiday liiskani? Miyay dadka ku nool Oregon ee hela adeegyadu hadal ku leeyihiin nidaamkani, kana waran shaqaalaha?

Sarah Edwards: Waan ku farxi lahaa in aan taasi sharraxo. Ka dib markii Sharciga Senate-ka 1534 la ansixiyay, tababarka kooxda shaqo ayaa la sameeyay si loo go'aamiyo nidaamyada tababarka ugu yar. Kooxda shaqo waxaa ku jira dad badan oo kala duwan waxayna ka soo kala jeedaan Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon, hawl-wadaagayaasha bulshada, daneeyayaasha, kooxaha wax u dooda, SEIU 503 oo ah ururka shaqaalaha ee matala shaqaalaha, shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed, shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed, dadka shaqaaleysiiya shaqaalaha, iyo wakiilada ka socda Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon. Kooxda shaqadu waxay runtii ahayd mid muhiim ah sababta oo ah waxaa ku jiray aragtiyo badan oo kala duwan. Kooxda shaqo waxay aqoonsatay mawduucyo ay ku jiraan jihayn iyo tababar muhiim ah, iyada oo waxa runtii aad ugu wanaagsanaa dadaalka kooxdani uu yahay wixii aan awoodnay si aanu iskugu keeno mawduucyo aanu dhammaantayo ku heshiinay oo u faa'iideyn doona shaqaalaha si la mid ah dadka hela adeegyada iyo taageerooyinka.

Whitney Taylor: Sarah, kaasi waa qoddob muhiim ah, waxaanan jeclaan lahaa in aan wax yar dadka la wadaago waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan kaasi. Markaa ta ugu muhiimsani, iyo waxa aan dhammaanteen tixgelinta siino, waa in tababarku xaqiijiyo fayo-qabka, tayada nololeed iyo badbaadada dadka hela adeegyada iyo taageerada, laakiin sidoo kale waa muhiim, ka qayb qaadashada tababarku waxay sidoo kale wanaajisaa ku qanacsanaanta shaqada.

Cheryl Miller: Waa sax. Kuwa dhammeysta tababarka waxay badanaa doortaan in ay muddo dheer sii joogaan xirfadahooda shaqo. Tani qayb ahaan sababteedu waa waxay dadka u saamaxdaa in ay xoojiyaan xirfadahooda oo si fiican diyaar ugu noqdaan in ay wax ka qabtaan cadaadiska/culeyska iyo walbahaarka la imaan kara shaqada. Ahaanshaha shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed ama shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed waa xirfad shaqo. Intaasi waxaa dheer, tababarku wuxuu muhiim u yahay horumarinta shaqo iyo in hore loo maro, sida shahaadooyinka Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon oo la heli karo iyada oo kaasi uu runtii horseedo wado ay mushahar sareeya ku gaaraan shaqaaluhu.

Whitney Taylor: Waa run, iyada oo ka hadalka horumarinta shaqo, ay jiraan waxyaabo kale oo ka mid ah Sharciga Senate-ka 1534 oo aynaan wali xusin. Sidaa darteed, marka lagu daro taxanaha tababarka shaqaalaha ee cusub iyo dib u eegista

taxanaha tababar, waxaa jiri doona shuruuda sii wadashada waxbarashada oo loogu talagalay shaqaalaha oo dhan. 24 bilood ee kasta, shaqaalaha oo dhan waxaa looga baahnaan doonaa in ay qaataan 12 saacadood oo ah sii wadashada waxbarashada.

Sarah Edwards: Sii wadashada waxbarashada waa mid aad u muhiim ah, aad baanan ugu faraxsanahay barnaamijkeena sii wadashada waxbarashada, waxaanan hadda ku gudda ku jirnaa hawsha dejinta koorsooyinkaasi, waxaanan waxyaabo dheeraad ah dadka kula wadaagi doonaa qayb kale.

Cheryl Miller: Hadda waxaanu ka hadalnay wax yar oo ku saabsan qiimaha tababarku leeyahay iyo waxa ay yihiin mawduucyada laga hadlay, sidee shaqaaluhu u bilaabi karaan?

Sarah Edwards: Taasi waa su'aal wanaagsan, Cheryl. Waxaanu runtii ku dhiirigelineynaa dadka in ay horay u socdaan oo ay hadda bilaabaan tababarka oo wax qabtaan. Si aad u bilawdo, waxaad booqan kartaa website-kayaga kaasi oo ah www.carewellseiu503.org/training, laakiin sidoo kale waxaanu soo raacin doonaa meesha la sii gelayo 'link' oo ku jirta qoraalada showga, si aad halkaasi uga sii riixi karto.

Cheryl Miller: Aad baad u mahadsan tihiin, Sarah iyo Whitney. Waa hagaag, tani waxay ina keenaysaa dhammaadka qaybteena. Nagu soo biir waxaanu ka hadli doonaa sida shuruudaha tababarka cusubi u saameynayo shaqaalaha cusub. Ilaa taasi laga gaarayo, si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato Sharciga Senate-ka 1534 ee ku jira warbaahintan dhanka maqalka ah 'podcast', fadlan booqo website-ka Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon iyo Carewell, kaasi oo ku xiran 'linked' qoraalada showga. Waxaad sidoo kale Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon iyo Tababarka Carewell SEIU 503 kala socon kartaa Facebook. Waan u mahad celinaynaa qof kasta oo qaatay waqti uu ugu soo biiro wada hadalkeena la adeegsanayo warbaahinta dhanka maqalka ah 'podcast'. Waxaanu rajeynaynaa in aanu macluumaad dheeraad ah kula wadaagno. Maalin wanaagsan.

Whitney Taylor: Mahadsanid, Cheryl.